**sannad canshuureedka 2025**

# Ilmo Ma ku xareysan karaa Canshuur-Celintayda

Can I Claim a Child on My Tax Return?

## Ma inaan ku xareystaa ilmo canshuurtayda?

Ku xaraysiga ilmo canshuurtaadu waxa ay kaa yareyn kartaa canshuurta aad celinayso waxa ayna sidoo kale kordhin kartaa lacagta kuu soo noqonaysa. Waa aad ku xareysan kartaa canshuurta "ilmo ama ehelka" la ogol yahay in lagu xareysto ee mas'uulka laga yahay. "Ilmaha la ogol' yahay in lagu xareysto waxaa sidoo kale la yiraa (Lacagta Canshuurta ee Dakhliga la Kasbado [EITC (Earned Income Tax Credit)]. Waxaa jira 3 jid oo ku xaraysiga ilmo canshuurtu uu kuu caawin karo adiga.




- Ilmo mas'uul waa aad ka noqon kartaa waana uun ku siin kartaa 'jaritaano' sare canshuurta aad bixinayso ah. Ka jaridani waa jarad laga jarayo dakhligaaga ka hor inta aan canshuurta aad celiso aan la ogaan. Dakhliga yar macnahiisu waa inaad celinayso canshuur yar.

- Waxa ay ku gelin kartaa martabad kale oo canshuur xaraysi ah kolkaa waxa aad bixin canshuur yar.

- Waxa aad heli kartaa qaar ka mid ah kiridhidyadda sidda Kiridhidka Canshuurta ee Ilmaha, Kiridhidka Dadka kale ee aad Mas'uulka ka tahay iyo haddii aad ka soo baxdo shuruudahooda, waxa aad heli kartaa waxa la yiraa EITC.

Waxaa jira xeerar ku saabsan inaad ilmo canshuurta ku xareysan kartid iyo in kale. Waa khasab inaad raacdo xeerarkaa. Hadii kale, waxa aad dhumin kartaa xaquuqdaada aad ku xareysanayso lacagta Canshuurta Ilmaha ee ilmaha lagu helo (EITC) mustaqbalka, ama waxaa dhici karta in lacag canshuurta kaaga soo noqtay lagu yiraa dib u sii gobolka ama hay'ada (IRS) ama aad bixiso canshuur dheeri ah iyo ganaaxyo kale. Qaar waxyaabahaa ka mid ahi waa ay dhib badan tahay in la fahmaa.

## Ku Xareysiga Qof kale Canshuurta

Waa aad ku xareysan kartaa canshuurta dadka aad mas'uul ka tahay. Qofka aad mas'uulka ka tahay waa "ilmo ama ehel la ogol" yahay in cabnshuurta lagu xareysan karo.

### Ilmaha la Ogol yahay

- Ilmahu waa inuu noqdaa ilmo uu dhalay qofka canshuur-bixiyaha ahi, ilmo labada qof oo isqabta uu midkood dhalay, ilmo dowlada loo hayo oo xaq u leh in lagu xareysto canshuurta, walaal, walaaley, ama cid ka soo farcantay mid ka mid ah eheladaa. Kuwaa waxaa ku jira ilmaha qof canshuur-bixiyaha ah loo geeyey si uu u korsado. Xataa hadii nidaamka loo maro

ilmaha loo qaadanayo korsigu uusan wali wada dhamaan. Ilmaha dowladda loo hayaa waa ilmaha ay u geeyso canshuur-bixiyaha hay'ad loo ogol yahay meelaynta ilmaha ama maxkamadi.

- Ilmahu waa inuu la noolaadaa canshuur-bixiyaha in **ka badan sannadka barkii** wadanka Mareykanka (U.S.). Maqnaanshaha ku meelgaar ah ee lagu maqan yahay iskuul, fasax, daryeel caafimaad, hawl militari, ku jirida xabsiga dhalinyaradda ama af-duubida waxaa loo xisaabiyaa siddii iyadoo guriga qoyska lagu nool yahay

  Waxaa jira arrimo kuwaa laga reebo oo quseeya waalidka is-fura ama kala baxa. Ka reebidu waxa ay u ogolaataa waalidka aan ilmaha la noolayn in ka badan sannadka barkii inuu sheegan karo inuu ilmaha wax taro kuna xareysto wax tarkaa canshuurta si uu u helo lacagta canshuurta ilmaha la isagu soo celiyo. Laakiin labada waalid mid uun baa si buuxda u sheegan kara ilmaha oo ku xareysan kara canshuurta. Ka reebidani MA quseeyso mart abada ku xareysiga canshuurta ee qofka ah madaxa qoyska, Ilmaha iyo Kiridhidka Dareelka Qofka Mas'uulka laga yahay, ama Lacagta Canshuurta ee Dakhliga la Kasbado (EITC).



- Ilmahu waa inuu ka yar yahay qofka canshuur-bixiyaha ah aan ka ahayn kolka ilmahu uu gabi ahaan iyo rasmi ahaan uu naafo u yahay. Waxaa jira xadidaadyo da'da ku xiran oo kala duwan oo ay leeyihiin nidaamyada lacag soo celintu:

  - **Ku Xisaabinta Canshuurta Kharashaadka Daryeelida Ilmaha–** ilmahu waa inuu ka yar yahay 13-sanno jir kolka daryeelka la siinayey, laakiin limahu da' kasta ayuu jiri karaa hadii uu naafo yahay uusana awoodin in asagu uu naftiisa daryeelo.

  - **Lacagta Canshuurta Ilmaha uga soo noqota –** ilmahu waa khasab inuu ka yaraado da'da 17 bisha Deseembar 31, 2025.

  - **Maratabada Canshuur Xareysiga Madaxa Qoyska iyo Lacagta Canshuurta uga soo noqota Dakhliga la kasbado (EITC) –** ilmaha xaqqa u yeelanayaa waa inuu 19-sanno jir ka yar yahay ama uu yahay arday saacado buuxa iskuul dhigta oo ka yar 24-sanno Deseembar 31, 2025. Ilmaha da' kasta jiri kara laakiin si rasmi oo buuxda ah naafo u ah.

- Ilmaha aan isa siin karin asagu in ka badan bar gargaarka ay naftiisu u baahan tahay sannadka. Manfacyada Sooshal Sakuuratiga (Social Security) ga ee uu ilmahu helay isagoo ah cidda xaq u leh waalidka dhinta ama naafada ah xaqiisa waxaa loogu xisaabiyaa dakhli uu ilmahu leeyahay oo kale. Tijaabada gargaarka (ilmahu isagu naftiisa gargaaraya) ma quseeyso kolka la ogaanayo in canshuur-bixiyahu uu haysto ilmo xaq u leh lacagta ilmaha la isugu soo celiyo ee (EITC).

- Hadii ilmaha ay u sheegan u karaan labada waalidba sidii ilmo xaq u leh in canshuurta lagu xareysto, laakiin labada waalid uusan midna sheegan ilmaha kolkaa, CID KALE ma ay sheegan karto ilmaha aan ka ahayn kolka Dalkhliga Guud (AGI) ee qofka sheeganayaa ilmahu uusan ka

badnayn wadarta Dakhliga Guud (AGI) ee labada waalid ee ilmaha dhalay. Xaaladan oo kale waxa ay dhacdaa kolka dad ehel ah oo badani ay meel ku wada nool yihiin.

- Marmarka qaarkood ilmo waxa uu noqon karaa mid xaq u leh in hal qof ka badan uu ku xareysan karo canshuurta, aysana dadkaasi ku heshiin karin cidda ku xareysanaysa canshuurta ilmahaa. Xeerarka canshuurtu ayaa waxa ay yiraahdaan waalidka inta ugu badan uu la noolaa ilmahu sannadkaa waa inuu sheegtaa kiridhidka ku xareysiga ilmaha ee canshuurta. Hadii ilmahu uu la noolaa waqti is le'eg labada waalidba, waalidka dakhliga ugu sareeya ee la qawimay leh waa inuu helaa kiridhidka.

  Haddii ilmahu:
  1. uusan labada waalid midna la noolayn
  2. uu yahay ilmo xaq u leh in canshuurta ay ku xareysan karaan dad ka badan hal qofi,
  3. dadkaasi aysan isku raaci karin cidda sheeganaysa ilmaha,

  kolkaa canshuur bixiyaha leh dakhliga ugu sareeya ee la qawimay ayaa helaya kiridhidka.



**Ehelka xaqqa u yeelan Kara ku Xareysiga Canshuurta**
Ehelka xaqqa u yeelan kara ku xareysigu canshuurtu waa qof:

- muwaadin Mareykan ah (U.S.), ajnabi degan Mareynkanka (U.S.), muwaadin Mareykanka ah (U.S.), ama ku noolaan jiray wadamada United States, Canada ama Mexico,

- xubin ka ahaa qoyskaaga sannadka oo dhan, ama qof qoyska ka tirsan oo ay dhici karto inuu kula noolaa ama uusan kula noolayn adiga sida:
  - ilmahaaga, ilmo aad awoowe ama ayeeyo u tahay, ama aad adeer ama eedo u tahay,
  - walaalkaa, walaashaa, walaalkaaga aabe, walaashaada aabe,
  - waalidkaa, awoowe, ayeeyo, qofka hooyo ama aabe ay isqabaan
  - eedadaa iyo adeerkaa, ilmo aad abti ama adeer u tahay,
  - sodogaa, sodohdaa, ninka gabadhaada qaba, gabadha wiilkaagu qabo,
  - seedigaa, ama dumaashidaa,

Ilmahu ama qofku badanaa ma **noqon karo** qof aad mas'uul ka tahay hadii:

- ay qof isqabaan ayna qofkaas canshuurta u wada xareystaan sidii dadka isqaba oo kale.

- ay soo gashay qof lacag ka badan $5,200 mudadda sannadka. **Laakiin**, qofku uu yahay ilmo aad adigu dhashay oo ka yar 19-sanno jir ama arday ka yar 24-sanno jir, waa uu noqon karaa qof aad mas'uul ka tahay waana ay kasban karaan lacag ka badan.

- Aad siisay in ka yar bar gargaarkooda sannadkaa

Xeerarka kor ku xusan waxa ay quseeyaan canshuurta dowlada dhexe. Minnesota waxa ay u isticmaashaa xeerar kuwaa oo kale ah canshuurta dakhliga iyo tan dhulkaba. Wax ka waydii arrintan qofka canshuurta kuu xareeya.

## Ma heli karaa lacagta Canshuurta ilmaha ee Dakhliga La Kasbado (EITC)?

EITC waa lacag canshuureed u soo noqota dadka shaqeeya. Inta ugu badan ee lacag ah ee qofka u soo noqon kartaa waa $8,046. Dadka kaligood ah iyo kuwa isqabaa labaduba waa ay heli karaan. Khasab ma aha inaad ilmo haysato, laakiin, lacagta soo noqonaysaa waa ka badan tahay tan kale hadii aad ilmo haysato. Kuwaasi waa xeerarka ku saabsan ilmaha kuwa aad sheegan kartid kolka aad canshuurta xareysanayso. Ka eeg hoos. *Hadii aad xeerarkaa jabiso, waxaa laguu diidi karaa lacagta ilmaha ee (EITC) ilaa iyo 10 sanno.*

Waa khasab inaad shaqeyn jirtay 2025. Ma aad heli kartid lacagta (EITC) hadii aad lacag ka kasbatay dibada Mareykanka (U.S.). Kasbashooyinkaaga iyo "Dakliga Guud" ee ku qoran foomka canshuurtaadu waa khasab inay ka yaraadaan:

- $61,555 hadii aad leedahay 3 ilmood ama ka badan oo ah ilmaha xaqa u leh
  (ama $68,675 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya)
- $57,310 hadii aad leedahay 2 ilmood ama ka badan oo ah ilmaha xaqa u leh
  (ama $64,430 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya)
- $50,434 hadii aad leedahay hal ilmood oo xaq u leh in lagu xareysto canshuurta
  (ama $57,554 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya)
- $19,104 hadii aadan lahayn wax ilmo ah oo xaq u leh in lagu xareysto canshuurta
  (ama $26,214 hadii aad tihiin labo qof oo is isqaba oo wada xareysanaya)

## Miyaan ka soo baxayaa shuruudaha lacagta Canshuurta Ilmaha ee Dakhliga la Kasbado ee (EITC)?

- Waa inaad tahay Muwaadin Mareykan (U.S.) ama degane qalaad sanadka 2025 oo dhan.
- Waxa aad u baahan tihiin inaad haysataan lambar sooshal sakuurati oo shaqeynaya **adiga, xilahaaga, iyo ilmahaaga** aad canshuurta ku xareysanayso.
- Dakhliga kaa soo gala maalgelintu waa khasab inuu ka yaraado $11,950.
- Ma sheegan kartid lacagta canshuurta ee (EITC) hadii qof kale uu adiga kugu xareysto canshuurta adigoo ah "ilmo xaq u leh' in canshuurta lagu xareysan karo.
- Caadiyan canshuur xareysigaagu ma noqon karo "is qabid iyo kala xareysi' laakiin waa uu ka duwan yahay canshuur xareysiga 2024 sannadihii hore waayo Sharciga Qorshaha Samata-bixinta Mareykanka (American Rescue Plan Act) awgii. Sannadkan waxa aad sheegan kartaa waxa la yiraa EITC waxa aadna ku xareysan kartaa sidii "is qabid iyo kala xareysi" hadii aad la nooshahay ilmo aad dhashay oo xaq u leh in ka badan sannadka barkii ama:
  - Aadan ula noolayn isla qoys sida xilaha kale ugu yaraan 6 dii bilood ee ugu dambaysay 2025, AMA



– Si sharciyan ah aad uga guuray sida uu qabo sharciga gobolku iyadoo la haysto heshiis kala guurid ah oo qoraal ah ama amar cad oo kala bixid ah aadana ula noolayn isla qoyska sidii xilehaagii oo kale aakhirka 2025.

### Ma ku xareysan karaa ilmo si aan u sheegto lacagta canshuurta ee (EITC)?

Haa, hadii ilmahu uu ka soo baxo shuruudaha "ilmaha xaqqa" u leh ee ku xusan bogga koowaad ee warqadan xogta aruursan. 'ehelada xaqqa" u leh laguma xareysan **karo** Lacagta Canshuurta la Kasbado ee **(**EITC) da.

### Ma jiraan wax kale oo lacagta canshuurtu iigu soo noqon kartaa?

Waxaa dhici karta inaad hesho:

- Lacagta Canshuurta Ilmaha uga soo Noqota
- Lacagta ku Soo Noqota Ilmaha iyo Daryeelka
- Kiridhidka Canshuurta ee Ilmaha iyo Qoyska Shaqeeya ee Minnesota
- Kiridhidka Tacliinta K-12 ee Minnesota

Waydii arrimahaa qofka canshuurta kuu xareeya.

## Caawimaad Canshuurta ah oo Bilaash ah

Waxa aad heli kartaa caawimaad canshuurta lagaa caawinayo oo lacag la'aan ah hadii aad tahay danyar, waayeel ama naafo. Si aad u hesho caawimaad deegaankaaga ah, ka wac hay'ada United Way gobolka oo dhan lambarka ah 2-1-1, ama gal shabakaada, https://www.211unitedway.org/. United Way waxa ay kaa caawin kartaa inaad ku hesho akhbaar ah afka aad u dhalatay. Waxaad sidoo kale aad heli kartaa caawimaad lacag la'aan ah oo deegaankaaga ka jirta hadii aad booqato shabadakada www.irs.gov/vita.

***Xogta aruursan ee warqadani waxa ay quseeysaa uun canshuurta sannadka 2025. Canshuur-celinta waa in la xareystaa ugu dambayn bisha Abriil 15keeda 2026.***

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**